



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Agoosto 25, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xisaabinta/hanti dhawrka ee Xoghaya Gobolka

Xafiiska Xoghaya Gobolka ee dhawaan dhammeystiray xisaabinta/hanti dhawrka ee Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka, oo gaar ahaan diiradda lagu saaray bixinta adeegeena la siiyo dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka iyo istiraatiijiyadaha lagu taageerayo dadaalada wax lagu hagaajinayo. Waan ka mahad celinaynaa fursada lagu baaraayo bixinta adeegeena waxaan ku raacsanahay kuwo badan oo ka mid ah natiijooyinka ka soo baxa Xoghaya Gobolka.

Xisaabintu/hanti dhawrku guud ahaan waxay ahayd mid wanaagsan. Gaar ahaan, hanti dhawrku wuxuu xusay awooda qorshaha istiraatiijiyadeed ee ODDS, kaasi oo tilmaamaya hawsha, aragtida, hadafka, iyo istiraatiijiyadaha meel marka ah si loo xaqiijiyo in dadka u baahan taageeradu ay heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin si ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa. Waanu qiimeynaynaa oo ka mahad celinaynaa ka qayb qaadashada joogtada ah ee bulshada I/DD waxaan ku faraxsanahay iskaashiga aanu aburnay ee lala leeyahay dadka qaba I/DD, qoysaska, daryeel bixiyayaasha, iyo hay'adaha maamulka kiiska. Xisaabintu/hanti dhawrku waxay sidoo kale iftiimiyay qaabkeena dhanka sinnaanta oo wargeliya siyaasadda iyo go'aanada miisaaniyadeed, Qorshaheena Adeega Sinnaanshaha, iyo dadaaladeena la kordhiyay si loo bixiyo macluumaad ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingiriisiga.

Waxaa jiray lix talo oo loogu talagalay wax wanaajinta, kaasi oo si faahfaahsan looga heli karow [warbixinta xisaabinta/dhanti dhawrka](#). Waxaan jeclaan lahaa in aan tilmaamo laba ka mid ah meelahaasi iyo waxa aan qorsheynayno in aanu sameyno si loo wanaajiyo meelahani.

- Nidaamka cabashada. Waxay xisaabintu/dhanti dhawrku xusaysaa in nidaamka cabashada ee ODDS u baahan yahay in la wanaajiyo. Gaar ahaan, warbixintu waxay xustay in dadka ka tirsan adeegyadu ay tahay in ay ogaadaan nidaamka cabashada iyo ujeedadiisa iyo qiimihiisa inta lagu jiro xiriirada maamulka kiiska ee loo baahan yahay. La sii socosho ahaan, ODDS waxay bixin doontaa tababar dheeraad ah oo la xiriira caddeynta cabashooyinka rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, waxyaabaha laga filayo maamulayaasha kiiska si ay uga hadlaan kala doorashada gudbinta cabashooyinka iyo sidoo kale sida xafiisyada maamulka kiisku uga jawaabaan cabashooyinka.
- Wacyigelinta daneeyaha. Xisaabintu/dhanti dhawrka waxay ku baaqday baahida loo qabo in ODDS ay kordhiso wacyigelinta daneeyaha iyo wax helitaanka iyada oo la kala duwayo waqtiyada kulanka, la kordhinayo kulamada dhanka fiidiyowga, iyo ka shaqeynta in daneeyayaal kala duwan la keeno guddiga iyo kulamada. ODDS ayaa ka shaqeynaysa dadaaladani iyada oo adeegsanaysa qorshaheena sinnaanshaha.

Waan ka mahad celinaynaa fursada ah in la yeesho Xafiiska Xoghaya Gobolka oo baara bixinta adeegeena waxaanan ku faraxsanahay dadaalada aanu sameynay ee ku saabsan qorshaha istiraatiijiyadeed, qorshaha sinnaanshaha iyo dadaalada lagu gaarayo aragtideena iyo hadafkeena oo ah nidaam qofka ku saleysan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo

www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.